


Qoysaska CTC ee Qaaliga Ahaaw,

Bedqabka cunugaaga iyo sidoo kale bedqabka hawladeennada ayaa weli sii ah mudnaanteenna ugu sarreysa. Waxaan raacnaa dhammaan shuruucda CDC, Waaxda Caafimaadka iyo kuwa gobalka. Adeegyadeenna Waxqabadka Hore ee CTC, adeegyada 0-3 ee hoostaga Taageerada Hore ee loogu talagalay Carruurta Yaryar iyo Kuwo Socod-baradka ah (ESIT). Garaafka hoose waxa uu muujinayaa habka dib u gelida ESIT ee la cusbooneysiisay ayadoo la raacaayo sida ku xusan qorshaha gobalka **Laanta Caafimaadka Washington - Geedi socodka Dib usoo kabashada. Hada waxaan kujirnaa isteejka 2 aad ee ESIT, kaas oo oggolaanaya in hay'aduhu balaariyaan adeegyada shaqsiyaadka.** CTC hadda waxay qorsheynaysaa arrintaan. Ayadoo qayb ka ah qorshaheena, waxaa lagusoo xariiraaya adeeg bixiyaheena si uu kuu waydiiyo adeegaaga aad jeceshahay qaabka looguugu keeno.

Early Support for Infants and Toddlers (ESIT) Provider Agency Stages in Relation to Washington's Safe Start Phases



*Marxaladda 1 aad ee ESIT: Adeegyo Shakhsiyeed ee Xaddidan. Adeegyada aasaasi ahaan waa kuwo taleefoonka lagu sameeyo, haseyeeshee xaalado xaddidan oo ka reeban ayaa la sameyn karaa la-talin shakhsi ahaan ah hal mar si loo daboolo baahi gaar ah oo ku saleysan baahi caafimaad.

*Marxaladda 2 aad ee ESIT: Balaarinta adeegyada shaqsiyaadka; dookhyada keenista adeega waxaa kujira habka isku dhafka ah, oo ay kujiraan adeegyada tooska ah iyo adeegyada caafimaadka oonleenka ah ee la adeegsado taleefoonka, ama adeegyada caafimaadka oonleenka taleefoonka ee joogtada ah.

*Marxaladda 3 aad ee ESIT: Ku noqoshada adeegyo shakhsiyeed oo buuxa, iyada oo adeegyada meelaha fogfog laga bixiyo ay yihiin ikhtiyaari marka la doorbido.

Qorshahan waa mid daganeyn wuunna isbeddeli karaa, iyada oo ku xiran dhaqdhaqaaqa fayraska ee bulshooyinkeena. Haddii degmadeenu dib ugu laabato wajiga geedi socodka 1 aad, waxaa markaas nalaga doonayaa inaan dib ugu laabano marxalada ESIT ee 1 aad. Fadlan ogow in aan kula soo socodsiiin doono isbeddelo kasta.

Waqtiyadan waa waqtiyo anagga oo dhan nagu adag balse waxaa naga go'an inaan taageerno adiga iyo cunugaagaba habka ugu amaansan ee suuragalka ah. Waad ku mahadsan tahay fahamkaaga iyo dulqaadkaaga. Fadlan aan oggaado haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah. Waxaad igala soo xiriiri kartaa 253 216 0831, ama karens@ctckids.org.